

Xarumaha Caafimaadka “Neighborcare Health” ee Ku-salaysan Dugsiga Oggolaansho Adeegyada Caafimaadka

Xarumaha Caafimaadka Neighborcare ee Ku-salaysan Dugsiga waxay ku yaalaan Dugsiyada Dadweynaha Seattle. Neighborcare Health waa inay haystaan foom oggolaansho oo ay saxiixeen waalid ama wakiil sharciga kahor intaan la siin adeegyada ardayga marka laga reebo xaaladaha ay shaciyada fedraalka iyo/ama gobolku ay u ogol yihiin ardayga in u helo daaweynta caynkaas ah iyadoo aan oggolaansho laga hayn waalidka/masuulka. Haddii ardaygu uu ka sajiilan yahay dugsi aanuse ka sajiilnayn Xarun Caafimaad o Dugsi Ku-taal (SBHC), wuxu ardaygaas heli karaa adeegyada kalkaalasada dugsiga.

Waxaan halkan ku codsanayaa oo ku ku amrayaa:

Daabac Magaca Ardayga: _____ /_____/_____
Magaca Hore Xarafka Dhexe Magaca Danbe Taariikhda Dhalashada

inuu helo adeegyada daryeelka caafimaadka jira iyo kuwa daruuri ay arkaan shaqaalaha Neighborcare Health SBHC. Adeegyadan waxa soo raaci kara, hase ahaatee aan ku koobnayn, la talinta caafimaadka maskaxda, baadhitaano caafimaad oo joogto ah, naturopathy, jimicsiyo isboorti, daryeel da'yarta oo hufan, qiimeynta iyo daaweynta cudurada daran iyo dhaawacyada, tallaalada, daraasadaha iyo eegidda dhiigga, sawirada, raajada iyo adeegyada caafimaadka ilkaha. Shaqaalaha SBHC waxay dhiirgeliyaan ka qeybqaadashada qoyska ee daryeelka ay siiyaan ardayda. Hase ahaatee, haddii aan joogin, anigu waxaan oggolaansho ku bixinaya in ardayga uu helo adeegyada. Ogolaashaha waxa gaar ahaan la isku siinayaa marka ama xaaladda ardayga kor ku magcaaban u iskeeno/ay iskeento si loo daweyyo marka aan maqanahay. Ogolaansho waxa waliba la siinayaa in loo gudbiyo daryeel iyo haddii loo baahdo, qaadis xaalad degdegga dhakhaatiir kale, xirfadlayaal daryeel caafimaad, cisbitaalo, meelaha baadhista, ama hay'adaha daryeelka caafimaad haddi ay sidaa gartaan oo ay la noqoto lagamamaarmaan Xarunta Caafimaadka Neighborcare iyo SBHC shaqaalaha. Awoodsiantan ama ogolaashahan ma ogolaanayo in adeegyo la bixiyo oggolaansho la'aanta ardayga, iyadoo/isagoo aan karayn in u sidaa yeelo mooyaane. Neighborcare Health waxa ka go'an abuuritaanka guri ah daryeel caafimaad iyo ku dhiiri galinta xdhidh aad u dheer oo u dhaxeeya bukaanada yo bixiyayaasha oo ay ku jiraan dawaynta, daryeelka caafimaadka maskaxda iyo ilkaha. Neighborcare Health waxa ay la shuraakowday bixiyayaal kale oo ku jira bulshada kuwaas sidoo kale u arka kara bukaanada aan u adeegno si ay u hubiyaan daryeelka in la isku duway.

Sida waafaqsan sharciga gobolka iyo/ama federaalka, marka oggolaansho loo bixiyo daryeel, macluumaadka daryeelka caafimaad waa qarsoodi. Waxyaabaha qaar ayaa reeban. Tusaale ahaan:

1. Ardaygu wuxuu oggolaansho ku dhiibaya macluumaad saxeehan oo u bixiyo ama siidaayo.
2. Iyadoo muujinaysa/muujinaya khataraha waxyeelo u imanaysa qofka ama kuwa kale.
3. Iyadoo qabta/qabo dhibaato caafimaad oo nololaha halis gelinaysa oo u yahay/tahay da'deedu 18 sano ka hoos.
4. Iyadoo ay jirto sabab looga shakiyo gaboofal ama daayacaad.
5. Caddayn cudurada lakala qaado ama la isku gudbiyo, oo u baahan in loo sheego ama loo gudbiyo maamulka caafimaadka guud ee dadweynaha.

Ogolaashaha waxa loo bixinayaa in lala wadaago oo la isweydaarsado macluumaadka loo baahan yahay dhammaan bixiyayaasha daryeel caafimaad ee SBHC Xarunta Caafimaadka, oo ay ku jirto macluumaad isweydaarsiga ka dhaxeeya la taliyaha caafimaadka maskaxda, kaaliyaha caafimaad ee hawgalka iyo kaaliyaha caafimaad ee dugsiga si loo siiyo daryeelka caafimaad ee ugu wanaagsan ardayga kor ku magcaaban. Si loo sahlo iskudubaridka daryeelka, xogta ardayga ee SBHC Ku-taal waxa heli kara shaqaalaha SBHC ee Neighborcare Health. Oggolaansho waxa la siiyey kalkaalasada dugsiga si ay u bixiso daaweynta aan dhakhtar qorin (tusaale, Ibuprofen, Tylenol, Tums, iwm.) sida uu u qoray dhakhtarka SBHC.

Ardaydu waxa kale oo ay ka heli karaan adeegyo caafimaad si madaxbanaani ah kiliinigyada Neighborcare Health ee kasta. Oggolaansho waxa loo bixiyey adeegyada lagu bixiyo mid ka mida kiliinigyada caafimaadka Neighborcare Health ee soo socda:

High Point Medical-Dental Clinic
(Kliniga High Point Medical iyo Dental Clinic): 206-461-6966
45th Street Medical-Dental Clinic
(45th Street Kliinikada Caafimaadka iyo Ilkaha): 206-633-3350
Meridian Medical Clinic:
(Kliinikada Caafimaadka Meridian): 206-296-4990
Columbia City Medical Clinic
(Kliinikada Caafimaadka Columbia City): 206-461-6957
Central District Dental Clinic:
(Kliinikada Ilkaha Central District): 206-461-7801

Rainier Beach Medical-Dental Clinic
(Kliinikada Caafimaadka iyo Ilkaha ee Rainier Beach): 206-722-8444
Greenwood Medical Clinic
(Kliinikada Caafimaadka Greenwood): 206-782-8660
Lake City Medical Clinic
(Kliinikada Caafimaadka Lake City): 206-417-0326
Georgetown Dental Clinic
(Kliinikada Ilkaha Georgetown): 206-461-6943

Ogolaanshaha waxa la siiyey adeegyada la bixiyo Neighborcare Health inta lagu da jiro wakhtiga ardaygu is qoray Dugsi ah Neighborcare Health SBHC ama wakhtiga adeegyada la siiyey farmasii kale oo ah Neighborcare Health. La noqoshada oggolaanshahan waxa la sameeyn karaa wakhti kasta iyada oo loo qorayo SBHC.

Saxeexa ardayga: _____ Taariikhda: ____/____/____

Waalid/Masuulka : _____ Tarriikhda: ____/____/____

Magaca Wakiilka Masuulka ee Sharciga (Daabac): _____ Xidhiidhka: _____

MACLUUMAAD MUHIIMA OO DHEERAADA

Sida waafaqsan Sharciga Gobolka Washington, SBHC waxay siin oo ka gargaari ardayda helitaanka daryeel dibedda ah haddii loo baahdo. Sida waafaqsan Sharciga Gobolka Washington, dhalinyartu si madaxbanaan ayey u heli karaan daryeelka caafimaadka dhalimada da' kasta iyada oo aan ogolaansho la'aan waalid/wakiil.

Dhalinyartu waxay si madaxbanaan u heli karaan adeegyada alkoloda iyo daroogada iyo latalinta jirrada maskaxda laga bilaabo da'da 13 ogolaansho la'aan waalid/wakiil. SBHC waxay ku dhiirigelisaa arday kasta inuu waalidka/wakiilka la soicodsiiyo go'aanada daryeelka caafimaad markii suurtagala. Markii ay munaasib tahay, SBHC waxay ka garagaari ardayga kala hadlaka xaaladahaas waalidka/wakiilka.

Iyada oo dhalinyartu ay bixin karaan oggolaanshaha daaweynta, oggolaanshahoodu sharci ahaan waxa looga baahan yahay ruqsada macluumaadka la xidhiidha uurka iyo cudurada galmada ku faafa (oo ay ku jirto HIV/AIDS testing). Oggolaansho ka socda ardayga 13 iyo ka weyn, iyo oggolaanshaha waalidka/wakiilka ardayga 12 iyo kayar ayaa sharci ahaan loo baahan yahay ruqsada macluumaadka la xidhiidha latalinta alkolada iyo muqaadaraadka iyo jirrada maskaxda.